



Dabaaldeegga Maalinta Qaran ee Kalkaaliyaasha Caafimaadka

Maayo 12, 2022

Maalinta Kalkaaliyaasha Caafimaadka Dugsiyada ee Qaran, waxaan salaan u direynaa sideed iyo afartan kalkaaliye caafimaad oo u addeega Dugsiyada Dadweynaha Portland.

Kalkaaliyaasha caafimaadka dugsiyadeenu waxay safka hore kaga jireen xanuunkii faafayey ee COVID-19, iyaga oo wax ka qabashada xanuunka mas'uuliyadeeda daryeelkeeda u qaaday heer ka duwan iyada oo siyaabo kale gedisan raadkii uu ka tagay yahay mid aan la garaneyn xitaa iyada oo ay ka soo wareegtay labo sanno.

Kalkaaliyaasha caafimaadka PPS waxay siinayeen tallooyin iyo daryeel dugsi kasta oo laga soo sheegay inuu jira qof u dhacay xanuunka COVID-19. Waxay sameynayeen baaritaan, baaritaanada astaamaah xanuunka, waxay kale oo sameynayeen dabagal ay ku hayeen cida qabta xanuunka iyo iyaga oo wada sheekeysi adag la yeelanayey qoysaska kaasi oo ku saabsanaa marka ay ardaydu ay tahay inay joogaan guryahooda iyo marka ay ku soo noqonayaan dugsiga.

Waxay sidoo kale la shaqeeyaan maamulka PPS, shaqaalaha dugsiga sidii ay dabagal ugu sameeyaan dadka qaba xanuunka, go'aamiyaana sida ugu wanaagsan ee daryeelka dadka iyo tallo bixinta haddii loo baahan yahay taxadir dheeraad ah in la sameeyo sidii badbaadin lahaa caafimaadka iyo nabadjelyada bulshada.

Kalkaaliyaasheena caafimaadka iyaga ayaa qabtay dhammaan waxaas oo dadaal, intaas waxaa u dheer shaqadoodii caadiga ahayd ee ay qaban jireen ka hor inta aanu dilaacin xanuunka faafayey, iyaga oo la shaqeeya arday kasta sidii ay meesha uga saari lahaayeen caqabadaha is horaagi kara waxbarashadooda.

Waan uga baahi badan nahay kalkaaliyaasheena caafimaadka sidii aan awal ugu baahneyn. Iyo inaan u dabaaldegno dadaaladooda geesinimada leh, haddii ay tahay wax ka qabashada xanuunkani caalamiga ahaa ama daaweynta nabarada xaktimaha, isxoqitaanka iyo cun cunka sanka oo ay daaweynayeen tobonaan sanno.

Mahadsanidin!



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

